



ALLEGHENY COUNTY COURTHOUSE, 1886

HENRY HOBSON RICHARDSON

436 Grant Street, Pittsburgh, 15222

WAXAA SAWIRKA ISKA LEH RENEE ROSENSTEEL

Ayadoo kamid ah Dhismayaasha Quruxda Badan ee Magaalada kudhexyaala, Dhusmaha Maxkamada Gobalka Allegheny waxay ahaan jirtay dhismaha ugu caansan Pittsburgh. Natiijada tartankii loogalay naqshada dhismaha 1884, waxay ka dhalatay shaxdii guulaysatay ee uu lahaa naqshad yahanka Henry Hobson Richardson.

Qaabka dhismaha waxaa loo yaqaanaa Richardsonian Romanesque, waayo qaabka dhiismeedka culus ee xirfadihii dhagaxa iyo naqshada ee dhismayaasha wareegsan waxay xasuus kareebayaan qaab dhiismeedka Romanesque cathedrals ee Medieval Europe. Naqshadiisa dhismuhu waxay laxariirtaa Togaga Biyaha ee Roman-ka, macbadyada Suuriyaanka iyo farshaxanka qasriyadii Romanka. Richardson wuxuu mcluumaad badan oo cajiib ah kusoo daray naqshadaynta dhagaxa iyo jaranjarooyinka waawayn. Buundada Sighs, taasoo dulmarta wadada Ross Street, ayaa isku xirta Maxkamada iyo Xabsiga.

Biloowgii qarniga labaatanaad, xakabad ladhisay si hoos loogu dhigo saraanta wadada Ross Street kaasoo hoos loodhigay ilaa iyo 20 taako ayaa qasbay in meesha laga galo maxkamada laga raro goobtiisii hore, taasoo caqabad kukeenta marka lagalaayo maxkamada. Mudadaas kadib, maxkamado badan ayaa laga badalay muraayadaha daaqadaha qaarna waxaa lagu sameeyay cusbonaysiino yaryar, inkastoo qaarkood lagusoo celiyay si kasii diritaysan qaabkoodii hore.

Gobalka Allegheny wuxuu dhawaan kudhaqaayay barnaamij dib udhis guud lagu samaynaayo Maxkamada, asagoo balan qaaday in taariikhdeedii lasoo celinaayo, ayadoo dib loo casriyaynaayo naqshadihii quruxda badnaa si ay usii jiraan 125 sanadood oo kale ama kasii badan.

Waxaa qoray Charles L. Rosenblum, Ph.D

Naqshadyahan aqoonsiga caalamiga ah haysta, Henry Hobson Richardson (1838-1886) waxaa markasta loo aqoonsanyahay inuu yahay aabaha naqshada ee Maraykanka.





PITTSBURGH RECOLLECTIONS, 1984

ROMARE BEARDEN

**Gateway Center T-station, platform level,
Pittsburgh, 15222**

WAXAA SAWIRKA ISKA LEH RENEE ROSENSTEEL

Dadka inta badan ma oga in ay waxyaabo badan oo farshaxanka laxariira ay yaalaan systemka dhaqdhaqaaqa dadwaynaha ee Pittsburgh. Sanado badan oo bulshadu fikirkooda cabirayeen, Xasuus qorka Romare Bearden ee *Pittsburgh Recollections* xarunta cusub ee

Gateway T-station sanadkii 2012.

Pittsburgh Recollections waxaa markii ugu horaysay lagu rakibay Gateway T-station sanadkii 1984 ayadoo qayb ka ahayd qorshaha Maamulka Dakada si loogusoo daro farshaxano badan systemyada

dhaqdhaqaaqa dadwaynaha. Ayadoo uudhisay farshaxanihiistaha caanka ah ee Ameerikaanka ah Romare Bearden, darbigaan dhobada ah wuxuu kasamaysan yahay sharaxaad dhoobo ah, waxayna muujinaysaa xasuustii uu uga tagay Bearden magaalada Pittsburgh. Iskastoo uu kudhashay North Carolina uuna inta badan bartay farshaxanka aduunka New York, Bearden wuxuu xaagaayaal badan joogay guriga awoowgis ee kuyaala Pittsburgh, wuxuuna markasta xariir adag lalaha magaalada. Darbigaan Bearden wuxuu muujinayaa farshaxanka iskudhafka ah ee Pittsburgh kasoo leh ilqabad iyo sawiro qurxoon. Maska wabiyaasha astaanta u ah



magaalada waxay muujinayaan iskudarka iyo shaxda xasuusta Bearden ee Pittsburgh. Dhanka bidix, waxaa kuyaala meelo taariikhi ah: askarta qaba koofiyada sadx geeska ah waxay xasuusinayaan qofka daawanaaya aasaaska Fort Pit, iyo naqshadihii goomaystaha sida wareegyada, qoryaha iyo baabuurta daboolan waxay muujinayaan raadadkii dadaalka badnaa ee guumaystuhu. Geeska midig ee darbiga waxaa logu talagalay sawirada casriga ah: sawirada shaqaale sida saxamada qadada kuwaasoo usii socda shaqada, tuubada sigaarka iyo kooxo shaqaalaha alxanka ah oo kashaqaynaaya bir lashubaayo kuwasoo ah astaamaha dhaxalka warshadaha ee magaalada waxayna xasuus uyihiin shaqaalihii dhisay magaaladaan.

Waxaa Qoray Sylvia Rhor, Ph.D.

Romare Bearden (1911-1988) wuxuu ahaa farshaxamiiste Maraykanka aad looga xushmeeyo. Farsamooyinkiisii waxaa laga heli karaa madxafyada waawayn ee Maraykanka oo dhan.



AGNES KATZ PLAZA, 1999

Louise Bourgeois, Michael Graves, Daniel Kiley
Seventh Street and Penn Avenue, Pittsburgh 15222
WAXAA SAWIRKA ISKA LEH RENEE ROSENSTEEL

“Dhawr waxyaalood ayaa si fiican uqeexaaya magaalo marka lababac dhigo sida dadwaynuhu u arkaan,” ayaa lagu daabacay Wargayskii *Pittsburgh Post-Gazette* sanadkii 1999 bogiisii soobaxay Janaayo. Qoraayaasha wargaysku waxay amaaneen qorshsha hormarineed ee

dabaqa Agnes Katz Plaza, \$4 milyan qarash dhan oo ay bixisay Laanta Dhaqanka ee Pittsburgh Cultural Trust. Dib udhiska aaga waxaa keenay Tiyaatarka O'Reilly ee dhawaan ladhisey iyo geerashkeeda labalaariyaya uuna dhisay naqshadyahanka Michael Graves. Graves wuxuu kaashaday farshaxaniistaha Louise Bourgeois iyo naqshadayahanka dhulka kala hooseeya Daniel Kiley si dabaqa loodhiso.

Dhismaha kufadhiya 23,000-taako ee isku wareega ah waxaa sadexda gees uga wareegsan 32 geedaha linden ka ah.

Dhexbartanka waxaa kuyaala taalo 25 taako ah. Biyaha taaladu waa kuwo kulul waxayna socdaan sanadkii oo dhan. Hoos waxaa kujira saqal ay kujiraan tuubooyinka taaladu. Waxaa sadex kursi oo qaabka bu'da isha u eg si fikradaysan loodhigay gudaha dabaqa meelaha udhaw geedahana, waxaa yaala kurasta dheerdheer. Sagxada dhismaha waxaa lagu qurxiyay mutuleel.

Dabaqa Agnes Katz Plaza waxaa loo naqshadeeyay in taalada biyo duulka leh ay noqoto waxa ugu cajiibsan dhismaha. Kiley wuxuu doortay geedaha linden ka waayo waxay awood uleeyihiin inay iska difaacaan cimilada adag ayna kabadbaadi karaan daadadka dhulka jeexa. Intaas waxaa siidheer, hudhusnimada geedahaan waxay abuurtaa qaab dhismeed qurxoon.

Kuraasta farshaxanka isha ah leh ee Bourgeois waxay u egyihiin farshaxankeedii hore ee dadwaynaha ee kusaabsanaa sawirada qaybaha jirka. Taalada waxaa markii koobaad dhistay Bourgeois. Mararka qaar, labada tuubo ee biyaha kusayra korka taalada waxay u egyihiin naaso wax nuujinaaya, halka kaalisadii Bourgeois lagasoo xigtay inay tiri in labada biyo shubeen "ay matalayaan lamaane noloshooda isku milantay."

Hadafka ugu wayn ee dabaqa loodhisay in la aburo boos wayn oo dadka adeegsanaaya ay si xor ah ugu dhex socon karaan ayna udaawadaan farshaxanka iyo sawirada qaabab kaladuwan. Carol Brown, madaxwaynihii danbe ee Laanta Dhaqanka Pittsburgh ayaa sheegay in dabaqu uu noqonaayo "kordhin gaar ah oo lagu samaynaayo qaab dhismeedka Pittsburgh...qayb cajiib ah oo lagu kordhiyay meelaha banaana ee albaabada dibada sida Mellon Square iyo Point State Park."

Waxaa Qoray Rachel Klipa, Office of Public Art

Louise Bourgeois (1911-2010) wuxuu ahaa farshaxaniis aad loo xushmeeyo oo French-Ameerikaan ah.





MAGNOLIAS FOR PITTSBURGH, 2006

Tony Tasset

**Seventh and Penn Parklet , Pittsburgh,
15222**

WAXAA SAWIRKA ISKA LEH RENEE ROSENSTEEL

Magnolias for Pittsburgh oo Tony Tasset uu usameeyay Seventh iyo Penn Parklet waa farsamadiisii koobaad ee uu bulshada uga tago. Waxay kakooban tahay labo, sawir oo ah geedaha fiyoorayaasha bronze, midkastana uu leeyahay magool kasamaysan kudhawaad 800 geed ubax oo mid kasta midab kiisa leeyahay.

Waraa kuwareegsan farshaxanka Tasset shan geed oo fiyoorayaal nool ah, ivy, iyo iyo luuq lagu socdo.

Dhiirigalinta Tasset ee shaqadaan waxay bilaabatay marka uu eeygiisa kula lugaynaayay asagoo sii maray geed fiyoore cajiib ah. Wuxuu kacodsaday mulkiilaha geedka inuu "caariyo" uhaysto mudo dhawr bilood ah. Markuu fasax uqaatay kadib, Tasset wuxuu isku laabay geedkii, asagoo laankasta kuduubay fiilo. Markuu kulaabtay istuudyoowgiisa, Tasset iyo kaaliyaashiisu waxay u adeegsadeen fiiladii inay sawir farshaxameed kasameeyaan ayagoo isticmaalaaya alxan. Talaabadii xigtay, waxay kudabooleen birtii farshaxanka ahayd dhoobo iyo cinjir, kaasoo markii danbe lagu ganay naxaasta.



Marka geedkii soobaxay laamihiina soomuuqdeen, Tasset wuxu sawiray magoolada fiyooraha ayagoo kasamaysan shumac kahor intuuusan dhoobo kasamayn naxaasta. Laan kasta oo ubax ah waxaa loo sameeyay inay kaduwanaato kuwa kale, si markaas aysan ujirin magool isku eg.

Geedaha waxaa lageeyay qaybo kamid ah Pittsburgh halkaasoo loo kala qaybiyay Seventh iyo Penn Parklet. Hase yeeshee, shaqadoo dhan waxay ahayd mid uu sharaf kumudanyahay Tasset: "fikirka farsamo ee ah in fiyoorayaal laga sameeyo taalada biyo dhaca waxay muujinaysaa taariikhda waxsoo saar ee magaalada."

Waxaa soosaaray Rachel Klipa, Xafiiska Farshaxanka Dadwaynaha

Tony Tasset waa farshaxaniiste dagan Chicago, Illinois.



HOUSE PUBLICATIONS: HOUSE POEM, PITTSBURGH-BURMA HOUSE, JAZZ HOUSE

HUANG XIANG, THAN HTAY MUANG, OLIVER LAKE

303 SAMPSONIA WAY, PITTSBURGH, 15212

WAXAA SAWIRKA ISKA LEH RENEE ROSENSTEEL

Waxaa kumahadsan ururka Khayriga ah ee City of Asylum, Wadada Sampsonia e dhanka Waqooyi waxay noqotay kaydka xasuusaha. Waxaa looyaqaanaa *House Publications*, midabadaan waxay kamid yihiin hawsha ururka City of Asylum si loogu abuurto fursad qoraayaasha caalamka ee wadamadooda lagu cadaadiyo. Ilaa iyo hada waxaa jira sadex xarumood oo ay leedahay House Publications: Kuwaasoo kala ah *House Poem*, *The Pittsburgh-Burma House*, *The Jazz House*, iyo *The Winged House*. *House Poem* oo uudhisay Huang Xiang wuxuu xaruntii ugu horaysa oo nooceedu yahay *House Publications*. Qoraagii Chinese ka ahaa ee mucaaradka ah kaasoo ahaa qoraagii ugu

horeeyay ee asagoo dagan wax kuqora Sampsonia Way. Kadib sanado uu xabsi iyo cadaadis kujiray wadankiisii hooyo ee China, Xiang waxaa lagasiiyay xoryad uu wax kuqoro Pittsburgh. Isla markii uu yimid, Xiang wuxuu bilaabay inuu gabayadiisa kuqoro darbida, asago kuqoraaya qaabka shax Chinese-ka ah. Mudo kadib, dhismhii oo dhan waxaa buuxshay gabayadiisa, cadaynta xoriyada uu uhelay inuu wax qoro cabsi la'aan. Khet Mar, the Qoraagii sadexaad ee magaalada magangalyada kuyimid, waxay soogashay Pittsburgh maarso 2009 ayadoo katimbd Burma. Ninka qaba Mar, Than Htay Muang, farshaxamiiste dhanka muuqaalka ah, ayaa sawiray wareeyo gacan haadis ah oo kuwareegsan wadada 324 Sampsonia Way. Qaybta hore ee dhismuhu waxay muujinaysaa kirka Pittsburgh, buundooyinka jaallaha ah, iyo wabiyaasha magaalada. Geeska iyo koonaha dhismaha, Muang wuxuu qofka daawanaaya tusayaa asagoo katagay Pittsburgh oo aaday Burma, asagoo kabaxaaya gobalka Allegheny oo aadaaya Wabiga Irrawaddy. Si kaduwan sawirka Pittsburgh oo riyo ahaan ah, sawirka kusaabsan Burma waa mid naxdin badan. Halkan, Than Htay Muang wuxuu kumuujinayaa beeralayda iyo hooyoyinka iyo caruurta iskuxirxiran ee xabsida kujira, ayadoo haadka hilibka cunana dushoda heehaabaayo. Dhamaan qaybaha sawirka, farshaxaniistuhu wuxuu kudaray qoraalo farta Burmese ka ah. Dhismaha afraad ee *House Publication*, *The Jazz House*, waxaa lagu sameeyay iskaashi dhexmaray Muusigiista reer jazz ee Oliver Lake iyo farshaxaniiste Than Htay Muang. Sawirka ugu wayn, badhan amaan, oo adag, oo midabyo kaladuwan leh ayna kuqoranyihiin erayada "Just Be Good," waxay muujinayaan xasuustii caruurnimada ee Lake oo kaqabsatay nin dhib badan oo daris ahaayeen: "Ninkaan wuxuu kusocon jiray asagoo qaba jaakad kore iyo koofiyad, xataa marka xagaaga ay tahay. Wuxuu jakadiisa kudaboolay badhanada amaanka markasta oo uu cunug arkana, wuxuu uxiri jiray dhanada shaarkooda wuxuu usheegi jiray inay haday kooxda kamid yihiin." Ninku wuxuu Oliver usheegay in shardiga kaliya ee kooxda loga mid ahaado uu yahay: "Just be good."



Waxaa Qoray Sylvia Rhor, Ph.D.

Ururka City of Asylum waa urur khayri ah kaasoo fursad siiya taageerana qoraayaasha wadankoodii hooyo lagu cadibay.

